# TAAGEERO DHAQAALE OO WAXBARASHO OO LOOGU TALA GALAY WAX KU BARASHADA SWIIDHAN

## Loogu tala galay adigaaga waddan dibadda ah u dhashay

CSN FAKTABLAD SOMALISKA

*Warqaddan macluumaadka rasmiga ah waxaad ka akhrisan kartaa dadka waddamo dibadda ah u dhashay ee xaqa u yeelan kara taageero dhaqaale oo swiidhish ah (taageero waxbarasho, gunno tababarte, caawimaad waxbarasho billaabid iyo caawimaad dhaqaale oo ardayda la siiyo) oo loogu tala galay wax ku barashada Swiidhan. Maskaxda ku hay in macluumaadka ku qoran warqaddan macluumaadka rasmiga ah ay yihiin kuwo guud oo aysan ahayn qoraal sharci ah.*

### TAAGEERO DHAQAALE EE WAXBARASHO EE ISWIIDHISH AH

Marka aad codsatid taageero dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah waxay CSN baareysaa in si waafaqsan xeerarka iswiidhishka ama shuruucda Midowga Yurub aad xaq ugu lahaan kartid taageero dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah. Haddii CSN-tu ay go'aan ku gaarto in ay ku siiso taageero dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah, waxaan sidoo kale eegeynaa in aad buuxineysid shuruudaha kale ee in aad qaadan kartid taageero dhaqaale oo waxbarasho.

### YAA XAQ U LEH SI WAAFAQSAN XEERARKA SWIIDHISHKA?

Xaq waad u yeelan kartaa taageero dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah haddii aad Swiidhan deggantihid, aadna buuxineysid mid ka mid ah shuruudaha cutubka soo socda:

**Waxaad heysataa sharci degganaasho oo joogto ah (PUT)**
Haddii aad Laanta socdaalka ka heshay PUT (sharci degganaasho oo joogto ah) waxaad xaq u yeelan kartaa taageero dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah.

**Waxaa Swiidhan laguugu aqoonsaday in aad qaxooti tihid ama wax sidaas oo kale ah**
Haddi Laanta socdaalku ay kuu aragtay in aad qaxooti tihid, u baahantihid badbaado ama aad sharci degganaasho ku heshay xaalado si gaar ah loogu damqan karo, waxaad xaq u yeelan kartaa taageero dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah. Waxaad sidoo kale xigto u ahaan kartaa qof sidaas oo kale ah. Xitaa xaq waad u yeelan kartaa kaalmo dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah haddii ay Laanta socdaalku sharci kugu siisay si waafaqsan xeerka xaddidaadaha ku meel gaarka ah ee fursadaha sharci ka helidda Swiidhan. Adigaaga megengelyo doonka ah xaq uma lihid taageero dhaqaale oo waxbarasho.

Haddii sharcigaagu uusan weli sii shaqeyneyn xaq waad u yeelan kartaa sidaas oo ay tahay taageero dhaqaale oo waxbarasho. Waxay taasi shaqeyneysaa haddii aad codsatay in laguu dheereeyo sharciga degganaashada inti uusan kaa dhicin sharcigu.

Waxaa sidoo kale loo baahanyahay in codsiga cusub

- uu ku saleysanyahay isla wixii kii hore uu ku saleysnaa,

*ama*

- khuseeyo sharci cusub si aad Swiidhan dugsi sare uga dhigatid.

Sharcigaagi ee degganaashadu waa in uu ahaa mid xaq kuu siin karay taageero dhaqaale oo waxbarasho.

**In carruur ay kaala dhexeyso muwaadin/muwaadinad swiidhish ah**
Haddii aad leedihid carruur haysata dhalashada iswiidhishka, aadna si wadajir ah Swiidhan isula deggantihiin, xaq waad u yeelan kartaa taageero dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah. Waa in xitaa aad leedihid sharci degganaasho oo shaqeynaya oo aad ku qaadatay xiriir qoysnimo oo kaala dhexeeya qofka iswiidhishka ah ama aad Swiidhan ku leedihid xaq degitaan.

**Waxaad leedahay sharci degganaasho iyo wax si joogto ah Swiidhan kuugu xiraya**
Haddii aad leedihid xaq degitaan iyo wax si joogto ah kuugu xiraya Swiidhan, xaq waad u yeelan kartaa taageero dhaqaale oo waxbarasho oo iswiidhish ah. Cadi ahaan waad leedahay xaq degitaan haddii aad tihid

- muwaadin u dhashay waddamada EU/EES ama Swiizerland

## WAA MAXAY TAAGEERO DHAQAALE OO WAXBARASHO?

Taageero dhaqaale oo waxbarasho waxay noqon kartaa caawimaad lacageed oo waxbarasho, gunno tababarasho, kaalmo lacageed oo waxbarasho ama taageero waxbarasho billaabid. Waxaan halka si kooban ugu qeexeynaa taageerooyinka kala duduwan. Wax dheeraad ah waxaad ka akhrisan kartaa bogga www.csn.se.

**CAAWIMAAD WAXBARASHO**
Caawimaad waxbarasho waa kaalmo lacageed oo loogu tala galay adigaaga dhigta dugsiga sare, waxbarashada dadka waaweyn ama jaamacad. Waxaad heli kartaa caawimaad waxbarasho ilaa iyo xilli dugsiyeedka guga ee sanadka aad buuxineysid 20 sano.

**GUNNADA TABABARASHADA**
Gunnada tababarashadu waa kaalmo lacageed oo loogu tala galay adigaaga dhigta dugsiga sare ee waxbarashada tababarashada. Waxaad heli kartaa gunnada tababarashada ilaa iyo xilli dugsiyeedka guga ee sanadka aad buuxineysid 20 sano.

**KAALMO LACAGEED OO WAXBARASHO**
Kaalmada lacageed ee waxbarasho waa kaalmo lacageed iyo deyn aad codsan kartid marka aad dhiganeysid iskoollada shacbiga ah, waxbarashada dadka waaweyn, jaamacadaha xirfadaha ama jaamacadaha. Adiga ayaa dooranaya haddii aad rabtid oo keliya kaalmada ama haddii aad sidoo kale dooneysid lacagta deynka ah.

**TAAGEERADA WAXBARASHO BILLAABIDDA**
Taageerada waxbarasho billaabiddu waa kaalmo lacageed oo ay dadka shaqo la'aanta ah qaarkood qaadan karaan intii waqti gaaban ah si ay u dhigtaan waxbarasho dugsi sare, korna ugu qaadaan fursadahooda ku aaddan shaqada. Waa degmada uu qofku degganyahay meesha ugu horreynta qiimeyneysa dadka ka tirsan kooxda looga dan leeyahay taageerada waxbarasho billaabidda. Waana halkaas meesha aad codsiga ka sameyneysid.

CSN nr 4146O/2011/översättning av 4146A-2011

- qof xigto u ah muwaadin u dhashay mid ka mid ah waddamada EU/EES ama Swiizerland (caadi ahaan aan swiidhish ahayn)
- qof xigto u ah muwaadin iswiidhish ah, uuna xiriir idiinkaga dhexeeyay waddan kale oo ka mid ah waddamada EU/EES ama Swiizerland.

Wey jiri karaan wax Swiidhan si joogto ah kuugu xiraya haddii

- aad Swiidhan degganeyd, kana shaqeysay ugu yaraan laba sano
- aad 20 sano ka yareyd marki aad Swiidhan u soo guurtay, ayna cid waalidkaa ka mid ah degganyihiin, halkanna ka shaqeeyaan
- aad is qabtiin ama wada nooshihiin muwaadin/muwaadinad swiidhish ah, aadna Swiidhan isla wada degganeedeen ugu yaraan laba sano
- aad is qabtiin ama wada nooshihiin muwaadin/muwaadinad swiidhish ah, aadna wada degganeedeen ugu yaraan afar sano oo ay ka mid tahay ugu yaraan hal sano oo aad Swiidhan isla degganeedeen.
- aad is qabtiin ama wada nooshihiin muwaadin swiidhish ah oo aad carruur isu leedihiin, aadna ugu yaraan hal sano Swiidhan degganeedeen aad is qabtiin ama wada nooshihiin qof kale oo ajnabi ah, aadse Swiidhan wadajir u degganeedeen ugu yaraan laba sano. Ninkaaga, xaaskaaga ama qofka aad wada nooshihiin waa in uu markaas isagu si waafaqsan xeerarka iswiidhishka xaq ugu leeyahay taageero dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah.

Haddii aad halkan ka shaqeysay waa in aad shaqeysay muddo laba sano ah ugu yaraan waqti barkiis. Waxaa shaqo ahaan loo arkaa

- shaqo Swiidhan gudeheeda ah
- shaqo aad ka shaqeyneysid shirkad aad leedihid oo Swiidhan ka diiwaan gashan
- xannaano aad xannaaneyneysid canug kaaga oo toban sano ka yar
- shaqo la'aan uga qornaasho xafiis shaqo oo swiidhish ah
- ka qeyb qaadasho waxbarasho suuqa shaqada ah
- dhigashada iswiidhishka loogu tala galay ajaanibta (sfi)
- waxbarasho ama swiidhish wax ku dhigasho ku aaddan heerarka ugu dambeeya ee dugsiga hoose dhexe, ugu yaraan waqti barkiis
- waqti aad qaadaneysay gunno bukaan socod, gunno dhaqdhaqaaq ama wax sidaas oo kale ah.

**Haddii aad 20 sano ka yartihid**

Adigaaga ka yar 20 sano xaq waad u yeelan kartaa kaalmo dhaqaale oo swiidhish ah haddii aad Swiidhan ku leedihid sharci degganaasho ama xaq degganaasho, aadna adiga

- iyo waalidkaa aad ka tirsantihiin qoys muwaadin swiidhish ah ama qof buuxinaya shuruudaha xaqa loogu yeesho kaalmada dhaqaale ee waxbarashada ee iswiidhishka. Haddii aad u dhalateen waddan kale oo ka baxsan EU/EES waa in sidoo kale aad heysataan sharci ku saleysan xiriir qoys oo aad la leedihiin qof noocaas ah.
- leedihid waalid isagu muwaadin ah.
- laguugu meeleeyay guri goys ama rug ka mid ah waaxaha maamulka ee iswiidhishka.
- aad leedihid waalid ay kuu go'aamisay waax maamul oo iswiidhish ah.

## YAA XAQ UGU YEELAN KARA SI WAAFAQSAN SHURUUDAHA XEERKA MIDOWGA YURUB?

Waxaa lagula simi karaa muwaadiniinta iswiidhishka haddii aad buuxineysid shuruudaha sharciyada Midowga Yurub. Wax dheeraad ah oo ku aaddan shuruudaha ka akhriso cutubka soo socda:

**Waxaad ka shaqeysaa ama ka shaqeysay Swiidhan**

Adigaaga u dhashay waddan ka mid ah EU/EES ama Swiizerland xaq waad u yeelan kartaa taageero dhaqaale oo waxbarasho oo iswiidhish ah haddii aad tihid shaqaale ama shirkadle u soo haajiray Swiidhan. Si laguugu qiimeeyo shaqaale ama shirkadle soo haajiray ahaan, waa in aad shaqeysay in baaxad ahaan ku filan. Waxay taasi caadi ahaan ka dhigantahay 10 saacadood usbuuciiba iyo in shaqadu ay soconeyso ugu yaraan 10 usbuuc. Waxaad xitaa u baahantahay in aad in ku filin shaqada sii wadaneysid inta waxbarashadu ay socoto oo dhan oo aad mushaar ama gunno kale ka qaadaneysid shaqada.

Adigaaga shirkadlaha ah waxaa sidoo kale lagaaga baahanyahay in shirkaddaadu ay waddo howl dhaqaale leh oo ku filan iyo in ay ka qorantahay Laanta canshuuraha iyo Diiwaan gelinta dadweynaha.

Adigaaga joojiyay in aad shaqeysid waxaad mararka qaarkood xaq u yeelan kartaa taageero dhaqaale oo waxbarasho. Waxaad markaas u baahantahay in aad buuxisid mid ka mid ah shuruudaha soo socda:

- Waa in aad waxbarasho ku sii wadaneysid aaggaaga xirfaddaada, waxa waxbarashadu ay ka koobantahayna ay xiriir la leeyihiin shaqadaada Swiidhan. Waxbarashadu waa in ay noqotaa mid xirfad ku jeedda. Maaha in waqti dheer ka soo wareegyay markii shaqada aad joojisay.
- Waxaad tahay qof si ku meel gaar ah aan u shaqeyn kari sababo la xiriira cudur ama shil dhacay.
- Si aan ikhtiyaarkaaga ahayn ayaad ku weyday shaqadaadi Swiidhan, waxaad shaqo doon ahaan isugu qortay xafiis shaqo oo iswiidhish ah.

**Waxaad xigto u tahay qof u dhashay waddan EU/EES ah ama Swiizerland oo Swiidhan ka shaqeeya**

Adigaaga xigtada u ah qof u dhashay waddan EU/EES ah ama Swiizerland (caadi ahaan maaha iswiidhish) oo shaqaale ama shirkadle ahaan ugu soo haajiray Swiidhan, xaq waad u yeelan kartaa taageero dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah.

Waxaa xigto ahaan laguu arki karaa haddii aad tihid:

- nin, xaas, qof ay qof wada noolyihiin
- canug ama canug xaaska ama ninku dhalyay oo 21 sano ka yar

*mararka qaarna haddii aad tihid*

- qof dhaqaale ahaan ku xiran waalidkiis.

Haddii ninkaaga, xaaskaaga ama qofka aad wada nooshihiin uu swiidhish yahay, oo aad xitaa xiriir ku wada lahaydeen waddan kale oo EU/EES ah ama Swiizerland, waxaad mararka qaarkood xaq u yeelan kartaa taageero dhaqaale oo waxbarasho oo swiidhish ah. Xigtadaadu waa in ay markaas ka shaqeysaa ama shirkad ka waddaa Swiidhan ka dib markii ay dibadda waddanka soo degganeyd.

**Waxaad Swiidhan ku leedahay xaq degganaasho oo joogto ah (PUR)**

Haddii aad u dhalatay waddan ka mid ah waddamada EU/EES xaq aad u yeelan kartaa taageero dhaqaale oo waxbarasho oo iswiidhish ah haddii aad Iswiidhan ku leedihid xaq degganaasho oo joogto ah (PUR). Haddii aad Swiidhan si sharci ah ku degganeyd shan sano oo xiriir ah waxaad caadi ahaan leedahay PUR.

Adigaaga aan qof ahaan u dhalan waddan EU/EES ah waad heysan kartaa PUR haddii aad ugu yaraan shan Swiidhan si sharci ah ula degganeyd qof u dhashay EU/EES oo xigto kuu ah. Xigto waxaa loola jeedaa ninkaaga, naagtaada, qof aad wada nooshihiin ama canuggaaga.

**Waxaad tahay qof si joogto ah u deggan**

Xaq waad u yeelan kartaa taageero dhaqaale oo waxbarasho haddii Laanta socdaalku ay kuu aqoonsatay in aad si joogto ah Swiidhan u deggantihid. Taas waad heli kartaa sidoo kale haddii aad si joogto ah u degganeyd waddan EU ah oo aad sidaas darteed Laanta socdaalka uga heshay sharci degganaasho oo Swiidhan ah.

**Nidaamyo gaar ah**

Qofka adigoo kale ah jinsiyad dalka Ingriisiga ka haysto ama qaraabo la ah qofkaaso kale, waxaa khuseeyo nidaamyo gaaar ah. Sido kale, nidaamyo gaar ah ayaa khuseeya ilmaha cilmi-baareyaal ahaan dalka Iswiidan u joogaan, ilmaha muwaatinyiinta dalka Turkiga ee dalka Iswiidan ka shaqaysto ama ilmaha dadka haysto kaarka buluugga ee Midowga Yurub ama ruqsadda loo yaqaanno [ICT] ee dalka Iswiidan. Warbixin dheeraad waxaad kala

xiriiri kartaa Guddiga arrimaha waxbarashada [CSN]

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan caawimaadda waxbarashada, gunnada tababarashada, kaalmo lacageed oo waxbarasho iyo taageerada waxbarasho billaabidda waxaad ka heleysaa www.csn.se. Waxaad sidoo kale ka akhrisan sida aad u codsaneysid taageerooyinka dhaqaale. Haddii aad dooneysid in aad CSN cid kala hadashid, waxaad naga soo wici kartaa 0771-276 000, maalmaha shaqada 8.00–16.30.

**Waddamada EU waa**
Biljam, Bulgaariyo, Qubrus, Danmark, Estland, Finland, Faransiiska, Giriigga, Irland, Talyaaniga, Koroaatiya, Laatfiya, Lituaaniya, Luxemburg, Maalta, Holland, Pooland, Portugaal, Rumaaniya, Islofaakiya, Islofiinya, Isbayn, Jeegga, Jarmalka, Haangari iyo Osteriya.

**Waddamada EES waa**
waddamada EU iyo Island, Liechtenstein och Norway.